# Caddeyn Laga Bixinayo Waxbarashada Dugsiyada Dhexe Laga Rajeynayo

**Sebtamber 25, 2020**

Qoysaska Qaaliga ee Dugsiyada Dhexe PPS,

Waxa aan raaligalin ka bixineynaa jahawareerka ay arday fara badan iyo qoysaskoodu ay dareemayaan ee ku saabsan jadwalka waxbarashada dugsiyada dhexe iyo waxyaabaha laga rajeyneyo waxbarashada guryaha lagu qaadanayo. Todobaadkani oo dhana waxa aan la shaqeyneynay macallimiinta iyo maamulayaasha sidii aan u iftiimin lahayn fahamka wanaagsan oo la xiriira waayo-aragnimada waxbarashada dugsiyada dhexe iyada oo aan rabno inaan xaqiijino inaad ogaataan idinkuna waxyaabaha la idinka rajeynayo.

**Jadwalka dugsiga dhexe** waxaa loogu talogay inuu siiyo ardayda fursado uu isku xiro macallinka iyo da' yarta todobaadka oo dhan sidii ay u xaqiijin lahaayeen istaageerada iyo tartamid macno leh oo la jaanqaadayso heerka fasalkooda.

- **Isniitn ilaa Khamiis:** Ardaydu waxa ay si toosa ula shaqeynayaa dhinaca online-ka macallimiinta laga bilaabo saacadu marka ay tahay 9:30 subaxnimo ilaa 12:15 duhurkii.
- **Jimce:** Ardaydu waxa ay dhammaan la kulmi toos ah dhinaca muuqbaahiyaha fasladooda oo dhan iyaga o odhammeystiran ama kooxo ah; ama waxbarashadoodana ku qaadanayo online; ama waxa ay xafiiska kula kulmi macallimiintooda saacadaha shaqada dhexdooda.

Qeyb kasta oo waxbarashada la baranayo waxa lagu tilmaamo hoos ka fiiri.

**Waxbarashada Loo Qaadanayo Koox Isku Dhan**

- Macallimiinta waxaa laga filayaa inay siiyaan koox dhammeystiran waxbarashada maalmaha Isniinta/Tallaadada, ama waxa ay dooran karaan sidoo kale in waxbarashada kooxda la siiyo maalinta Arbacada, Khamiista, iyo Jimcaha, iyada oo ku xiran tahay baahida ardayda.

**Waxbarashada Loo Qaadanayo Koox Yar**

- Waxa aan ka warqabnaa in ardayda dugsiga dhexe ay u baahan yihiin fursado la iskugu xirayo ardaydooda kale, ama kooxo yar oo siinaya tani.
- Kooxaha yari waxa ay macallimiinta siinayaan fursad ay ardayda si fiican ugu bartaan.
- Kooxaha yar waxaa loogu talogalay in: 1) waxbarashadooda lagu xoojiyo, 2) laguna siiyo waxbarasho dheeraad ah ardayda u baahan in dib wax loo baro ama loo dheereeyo waqtiga waxbarashada. Kooxuhu waxa ay ku salaysnaan doonaan baahida ardayda.
- Haddii macallimiintu yihiin kuwa hoggaaminaya waxbarashada kooxaha yar waqtiga lagu gudo

jira, waxaa laga rajeyneyaa inay siiyaan shaqooyinka waxbarashada la dabaqayo ardayda kuwaasi oo aan qeyb ka ahayn kooxaha yar ama kooxaha.
- Ardaydu waxa ay fursad u heli sidii ay da'dooda iskugu xirmi lahaa waqtiga ay wada qaadanayaan waxbarashada kooxda yar.

Macallimiinta haddii ay isticmaalayaan waxbarashada kooxda kooban, waxbarashada kooxda isku dhan, ama saacadaha shaqada dhexdooda xafiiska maalinta Arbacada, Khamiista iyo Jimcaha waxaa laga rajeynayaa inay dhammeystiraan dhammaan waxyaabihii lagama maarmaanka ahaa ee heerka casharada ee dugsiyada degmadu aqoonsadeen in la dhammeystiro qaadashadooda.

**Waxbarashada La Qaadanayo Waqtiyo Kala Gedisan Inta Lagu Jiro Jadwalka Xiisadaha Fasalka**

- Waxbarashada la qaadanayo waqtiyada kala gedisan waa in ay la jaanqaadaa maxsuulka waxbarashada casharada macallimiinta ee tooska loo bixiyo.
- Waqtiga la qaadanayo waxbarashada waqtiyada kala gedisan (ee loogu talogalay xiisadaha 1aad ilaa 6aad ama 1aad ilaa 7aad), macallimiintu waxaa laga helayaa inay ardayda kula xiriiraan qaabka elektarooniga ah.
- Haddii ay macallimiintu hoggaaminayaa waxbarashada kooxda kooban waqtiga lagu jiro jadwalka xiisada fasalka, waxa ay ka rajeyneyaan inay siiyaan ardayda shaqada waxbarashada ee la qaadanayo waqtiyada kala gedisan inay la jaanqaado ardaydaa kale ee aan ka qeybqaadaneyn kooxaha kooban.

**Saacadaha Xafiiska**

- Waa in macallimiintu ay ardayda siiyaan ugu yaraan 30 daqiiqo todobaadkiiba inta lagu jiro saacadaha xafiiska.
- Waa in ay macallimiinta ay muujiyaan dabacsanaan maalinta ay u diiwaangaliyaan saacadaha shaqada ee xafiiska.

**U Gaar ah Casharada Kooxaha Kooban/La Talinta (1 duhurnimo ilaa 1:45 p.m.)**

- La taliyaasha iskuuladu waxa ay isticmaali xiisadani inay bixiyaan tallooyinka ay ardaydu u baahan yihiin. Iskuulada aan lahayn la taliyaasha waxay bixiyaan waqtigaasi inay siiyaan ardaydooda waxbarashada ku hooseysa gargaar iyo inay waqtiga waxbarashada u dheeraayaan.
- Macallimiintu waxa ay ardayda ula shaqeyneyaan si toosa ama waxa ay waxbarashadooda qaadanayaan si toosa waqtigani ardaydaas lala soo xiriiro.

**Waxbarashada La Qabatimayo (duhurkii)**

- Waxaa ardayda la rajeynayaa inay in si qiimo leh ula socdaan, shaqooyinka casharada oo ku salaysan heerkooda waqtiga lagu gudo jiro marka xiisadaha casharada sida tooska loo qaadanayo( Xiisadaha 1aad ilaa 6aad ama 1aad ilaa 7aad).

- In la xaqiijio in ay macallimiintu ay diirada saari karaan inay macallimiintu warcelin siiiyaan ardayda iyo inay isku kaashadaan si xirfadleh, lagama rajeyneyo inay ardayda u jawaabaan inta ay sida tooska casharada fasalka u qaadnayaa ee xiisadaasi.
- Ardayda marnaba loo xilsaari mayo inay ka qeybqaataan casharada waxbarashada ee la dabaqayo oo qeyb ka ah kooxaha iyada oo aan la kormeereyn, mar walba waa inuu joogaa macallin kormeerayaa oo la socda waxa ay qabanayaan.

**Qoraal U Gaar ah K-8**

- Qaar ka mid ah iskuulada K-8, Ciyaaraha (PE),Farshaxanka (Art), Caafimaadka (Health), Maktabada (Library) iyo Macallimiinta Farsamada waxa ay addeeg siinayaan dhammaan fasalada oo dhan. Haddii ardaygaagu la diiwaangaliyey inuu wax baro ardayda yar yar waqtiga loo qorsheeyey inay dabaqaan ardayda xiisadaha dugsiyada dhexe, suurtagal noqon meyso inay u jawaabaan ardayda/qoysaska inta lagu jiro xiisadahaasi waxbarashada.

Sidii caadadda ahayn waxaan idiinka mahadcelineynaa samirkiina iyo dabacsanaantiisa inta aan la shaqeyneyno hoggaamiyaasha iskuulkadeena iyo macallimiinta sida joogta ah u horumarinayo waxbarashad ay siinayaan dhammaan ardaydeena heerarkooda kala duwan.